



Si aad boos uga heshid dugsi
Waa qasab in ay annga na
dedmada
soo gaaro codsigaaga
Ugu dambeyn 15 ka
diseember

Kala doorashada dugsi inta ka horreeysa fasalka barbaarinta

Fasalka barbaarinta waa tallaabada ugu horreeysa ee dugsi hoose dhexe. Ujeeddada waxqabadku waa in la dhiirrigeliyo sii wadidda waxbarashada iyo kobcinta ilmo kasta. Fasalka dugsi barbaarinta waa khasab dhammaan carruurta ku nool Iswiidhan laga soo billaabo xilliga dayrta ee sannadka ay lix sano jirsanayaan. Shaqada fasalka dugsi barbaarinta waxa ay ku dhacdaa xiriir dhow oo lala yeesho kooxaha dhigta fasalada kale ee dugsi iyo xarumaha xilliga firaaqada.

waxaa ku jira ugu yaraan 20 saacadood toddobaadkii. Dugsi walba isaga ayaa go'aamiya sida ay waqtiga ugu kala qaybinaayo maalmaha.

Kuwiina su'aalo ka qaba wax -qabadka dugsi gaarka ah ama doonaya in ilmahaagu boos ka helo dugsi gaarka ah, la xiriir maamulaha dugsi gaarka ah anette.ekskog@falun.se

Inta lagu guda jiro cudurka faafa ee hadda jira, dugsiyadu ma haystaan fursad ay ku casuumaan waalidiinta ama qofka masuulka ka ah ilmaha shirarka ku saabsan macluumaadka, iyada oo lagu saleynayo talooyinka ka yimid ka hortagga cudurada faafa ee Dalarna. Dugsiyadu waxa ay taa beddelkeeda ku bixin doonaan macluumaad cad falun.se, si aannu hadba ugu sharaxno hadba sida ugu macquulsan wax qabadkeenna. Haddii aad qabtid wax su'aalo ah ama iswaydiimo ah, waxaa lagugu soo dhaweynayaa in aad la xiriirto maamulayaasha iyo maamule ku -xigeennada.

Codsiga

Haddii aad adigu ka rabto boos dugsi degmada, waxa aad buuxinaysaa doorashadaada gacanta koowaad, gacanta labaad iyo gacanta saddexaad ee ku lifaaqan foomka "**Doorashada dugsi ee ka hor fasalka barbaarinta**". Codsigu waa in uu soo gaaraa: Degmada Falu, Maamulka

Carruurta iyo Waxbarashada, 791 83
FALUN, **waana in uu gacanta noo soo galaa ugu dambayn 15 December.**

U soo gudbi codsigaaga waqti fiican si aan annagu ku helno waqtigii la cayimay. Annagu mas'uuliyad nagama saarno haddii adeegga boostada uu qaato waqti ka badan intii la filayay.

Waa muhiim in aad soo gudbiso arjiga

Waa muhiim in aad doorato dugsi sababto ah si toos ah uma lihid xaq in aad meel ka hesho dugsiyada degmada ee ku xiran cinwaanka gurigaaga. Dugsiyada qaarkood waxaa ku yar boosaska, sidaas darteedna waa muhiim in aad na soo siiso sadex xulasho. In aad adigu oo doorato dugsi inta uu socdo waqtiga doorashada dugsi, waxa aad kordhineysaa fursadda aad ku heli karto dugsi aad rabto. Waxa kale oo aad haysataa fursad aad ku xusto dookha walaalaha oo aad calaamadiso haddii aad rabto in aad safka u gasho doorashadaada koowaad.

Xaqiijinta in arjiga la helay

Adigu waxa aad ku heli doontaa xaqiijin emayl ahaan in arjigaagii la helay, waa haddii aad gelisay cinwaanka emailkaaga arjiga.

Tilmaamaha ku meelaynta dugsi

Ogaallo ku saabsan annaga tilmaamahayaga ku meelaynta dugsi ee fasalka xannaanada ayaa kusoo lifaaqayna.

Ku soo wargelinta ku meelaynta dugsi

Ugu dambayn 1 Febraayo, waxa aad adigu heli doontaa warqad ku saabsan ku meelaynta dugsi iyada oo loo marayo warqad cinwaanka diiwaangelinta dadweynaha ee ilmaha.

Codsiga booska aqalka waqtiyada firaaqada

Haddii aad adigu u baahan tahay sii daryeelid ka hor iyo / ama ka dib maalinta dugsiga, waxaa jira aqalo waqtiyada firaaqada oo lacag la bixiyo. Aqalada waqtiyada firaaqada waxa ay furanyihiin laga soo billaabo 1 da bisha agoosto. Adigu waxa aad booska aqalka waqtiyada firaaqada ka codsanaysaa adigoo adeegsanaya mareegaha degmada falun.se marka lagu soo ogeysiyo ku meeleynta dugsiga.

Codsiga waxaa la sameeyey ugu yaraan 14 maalmood ka hor taariikhda ku meelaynta la doonayo. Mana jirto wax saf ah oo loo galo aqalada waqtiyada firaaqada.

Codsiga kaarka gaadiidka dugsiga ama kaarka baska

Falu kommun
Barn- och
utbildningsförvaltningen
023-830 00

Carruurta dhigata fasalka barbaarinta dugsiga waxa ay xaq u leeyihiin gaadiidka dugsiga / kaarka baska haddii masaafada u dhexeysa cinwaanka diiwaangelinta dadweynaha iyo dugsiga lagu meeleyay ay tahay laba km ama ka badan. Haddii aad adigu doorato dugsi aan ahayn kan aad ka tirsan tahay, ma aha wax la hubo in aad xaq u leedahay gaadiidka dugsiga xitaa haddii masaafada guriga ay dheer tahay. Adigu waxa aad ka codsanaysaa kaarka gaadiidka dugsiga / baska dugsiga bogga degmada falun.se inta u dhexeysa Maarso 14 - Abriil 3.

Si diirran ugu soo dhowoow dhanka dugsiyada hoose dhexe ee Falu!

Gustaf Malmberg

Madaxa waxqabadka dugsiyada hoose dhexe iyo dugsiyada duwan

FALUN